

PROTECTIVE SERVICES OFFICER



VICTORIA POLICE WAXAY RAADINAYSAA DAD QAATA

DOORKA PROTECTIVE SERVICES OFFICER (PSO).

Maxay PSO qabataa?

PSO waxay ka shaqeeyaan dhamaan maxadooyinka tareenada ee Fiktooriya oo dhan laga bilaabo 6da maqribkii ilaa 3da subaxii maalin walba si loo caawimo xafidaada dad gaaraya 400,000 oo raaca tareenada. PSO waxay masuul ka yihiin.

- Si feejigan ula socodka dadka raaca tareenka waxayna muujiyaan waxqabadkooda
- Caawinta dadweynaha doonaya waxweydiiska
- Dadweynuhu dareemaan amaan
- Wax ka qabashada shilalka dabeecada lidka bulshada, sida alkolada, daroogada dembiga la xiriirta iyoo waxyeelida hantida



VICTORIA POLICE

Ma noqon karaa PSO?

Si aad xaq ugu yeelato inaad noqoto sarkaalka PSO ee Victoria Police, waxaa waajib kugu ah inaad buuxiso shuruudaha soo socda:

Haysashada deganaanshaha Australia ee rasmiga ah ama dhalashada Australia

Waxaa waajib kugu ah inaad noqoto muwaadin Australiyaana ama inaad haysato deganaansho rasmi ah si aad uga mid noqoto Victoria Police.

Muujinta akhlaaq wanaagsan iyo sumcad

Victoria Police waxay sameeyaan baaritaan aad u ballaaran oo lagu eegayo hab dhaqanka arjiilaha doonaya Protective Services Officer inta lagu jiro heerka kala sooca. Macluumaad intaas ka badan oo khuseeya Victoria Police booqo tusaha taariikhda qofka: www.policecareer.vic.gov.au/pso/forms-pso.

Inaad buuxiso shuruudaha ugu sahlan oo caafimaadka

Waxaa lagaaga baahan doonaa inaad buuxiso shuruudaha sida waafaqsan nadaamka caafimaadka ee Victoria Police si loo qabto hawsha la iska rabo. Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan shuruudaha caafimaadka booqo: www.policecareer.vic.gov.au/pso/forms-pso.

Muujinta xirfada ku hadalka afka Ingiriiska

Mid ka mid ah xirfadaha asaasiga ah oo aad u baahan doonto inaad muujiso dalbade PSO ahaan waa awooda si fiican ugu hadlida afka Ingiriiska. Taas macneheedu waxa weeye awooda akhrinta, qorista, dhegaysiga iyo af ahaan ku xiriirida luqada Ingiriiska heer kuu ogolaanaya inaad si wax ku oolla ugu fuliso waajibaadkaaga hab wada shaqayn ah.

Ogsoonow: Victoria Police waxay kaloo gaar u xiisanyasaa qorista dad ku hadla luqada kala duwan kuwaas oo awooda inay la hadlaan xubnaha dadweynaha afkooda ay u dhasheen dibna ugu gudbiyaan macluumaadkaas afka Ingiriiska.

Bixinta caddaynta shahaado waxbarasho haddii aad ka yar tahay 21 sanadood

Haddii aad ka yar tahay 21 sanadood, waxaa waajib ah inaad ku najaxday shahaada Waxbarashada Fiktooriya (Victorian Certificate of Education (VCE)) ama mid u dhiganta (Senior Level Victorian Certificate of Applied Learning (VCAL) waa la aqbalayo) inta aan la bilaabin tababarka.

Inaad Haysato Laysanka Gaari wadida Fiktooriya

Waxaa waajib ah inaad haysato laysanka gaari wadida Fiktooriya waqtiga hawl-bilawga. Kan awtomaatiga ah iyo kan kaleba waa la aqbali karaa.

Waxaa maxay waxyaallaha kale ee ay tahay in aan la socdo ka hor inta aanan dalban PSO?

- Sarkaalka PSO ahaan waxaad shaqayn doontaa 80 saacadood labadii asbuucba kalkan joogto ah (ka bilaabanaya 3da casarkii ilaa 7da fiidkii oo dhamaanaya 2da subaxii ilaa 3da subaxii)
- Sarkaalka PSO ahaan waxaad waajahaysaa khilaaf, rabshadwadaayaal iyo dad ay wax yeeshay alkoholadu
- Sarkaal PSO ahaana waxaa lagaa filayaa inaad dhinac iska dhigto aragtidaada shakhsiyeed, diimeed ama waxaad siyaasad ahaan aaminsan tahay si aad u ilaaliso qaanuunka Dawlad Goboleedka
- Sarkaal PSO ah ahaan waxaa lagaaga baahan doonaa inaad qaadatao hub
- Sarkaal PSO ah ahaan hab dhaqanka markaad shaqada ku jirto iyo markaad ka maqan tahayba wuxuu muujinayaa naftaada iyo Victoria Police. Dabeecadani waa inay ahaataa mid mustawaheedu sarreeyo kana tarjumayso qiyamka Victoria Police
- Sarkaal PSO ah ahaan waxaa lagaaga baahan yahay inaad hesho gaadiid gaar kuu ah inaad shaqada ku timaado ama kaga baxdo maadaama gaadiidka dadweynuhu shaqada joojinayaan markaad shaqada ka baxayso
- Sarkaal PSO ah ahaan waxaa lagu siin doonaa fursada inaad ku muujiso meelaha aad doonayso inaad ka shaqayso tababarka ka dib; si kasta ha ahaatee taasi waxay ku xiran tahay in halkaas boos ka banaan yahay.

Waa maxay habka dalabka shaqada PSO?

Arjiile ahaan, waxaa lagaaga baahan doonaa inaad ka gudubto heerarkan kala duwan ka hor inta aan lagu xulin shaqada Victoria Police:

Talaabada 1aad	Soo qadim dalab online ah www.policecareer.vic.gov.au
Talaabada 2aad	U fadhiiso imtixaan
Talaabada 3aad	Samay hubinta nololshadii hore oo asaasi ah
Talaabada 4aad	Samay imtixaanka fiyoobida
Talaabada 5aad	Samay baarista xaalada nafsaaniga ah
Talaabada 6aad	Samay qiimaynta caafimaadka
Talaabada 7aad	Samay baaris ballaaran oo nololshadii hore
Talaabada 8aad	Samay waraysi ay kula yeelanayaan guddi

Waa maxay mushaharka iyo waxyaallaha kale oo uu hellayo PSO?

- Mushahar asaasi ah oo wanaagsan laga bilaabo maalinta ugu horraysa tababarka
- Mushahar sanad walba siyaadaya iyo lacagta gunada oo kaltanada
- Fasax sagaal asbuuc ah (oo ka kooban shan asbuuc oo fasax ah, laba asbuuc oo ka yimid ciidaha oo lagu daray 10 berri oo waqtiyada aad maqan tahay)
- Fasaxa Ciidanka Difaaca
- Lebisyo shaqada oo la bixinayo
- Balanqaadka Shaqada

Waa maxay tababarka aan qaadanaya PSO ahaan?

Dhamaan shaqaalaha PSO waxay u qaadanayaan tababar 6bilood ah oo la xiriirta shaqadooda Victoria Police sida soo socota:



Asbuuca 1aad ilaa 12aad: Tababarka Akadeemiyada Victoria Police ee sharciga, xirfada wada xiriirka iyo tababarka amaanka shaqada (oo ay ku jiraan hub ku tababarida)



Asbuuca 13aad ilaa 24aad: Tababarka maxadada Melbourne CBD iyada oo uu weheliyo hage.

Weli ma baahan tahay macluumaad siyaada ah?

Victoria Police waxay ku qabtaan fadhiyada macluumaadka PSO Melbourne iyo agagaareheeda asbuuc walba.

Ka hubi taariikhaha iyo waqtiyada adoo booqanaya:
www.policecareer.vic.gov.au/ps0/info-session

Ama

E-mail dir wax-isweydiinta:
rsbmarketing@police.vic.gov.au



VICTORIA POLICE